# Wada hadalada Bulshada: Hubinta Kala guurka Waxbarashada Hore



Oregon's Kitchen Table

National Policy Consensus Center NPCC

Portland State University

## Wada hadalada Bulshada: Hubinta Kala guurka Waxbarashada Hore

Sanadkii 2022, Waaxda Waxbarashada ee Oregon (ODE) iyo Waaxda Waxbarashada Hore (ELD) ayaa isku dayay hab cusub oo la iskugu xirayo qoysaska iyo dugsiyada si looga caawiyo carruurta iyo qoysaska in ay si habsami leh u bilaabaan dugsiga barbaarinta carruurta 'kindergarten'. ODE iyo ELD waxay dugsiyada ku martiqaadeen in ay qabtaan "wareysiyada qoyska" oo u dhexeeyaa qoysaska iyo macallimiinta. Sagaal dugsi oo ku yaala Oregon ayaa isku dayay wareysiyada qoyska si ay u tijaabiyaan ama "pilot" sida ay wareysiyadu shaqeyn karaan. Wareysiyadau waa hal qayb oo ka mid ah sida ODE ay iskugu dayeyso habab cusub si qoysaska looga caawiyo in ay bilaabaan dugsiga barbaarinta carruurta. ODE waxay mashruuca tijaabada ah ugu yeertaa "Early Learning Transition and Family Interview Project." ODE waxay qorsheynaysaa in ay mashruucani tijaabada ah sii wado ee lala leeyahay dugsiyo badan sanadaha soo socda.

ODE iyo ELD waxay rabaan in ay ogaadaan sida ay wareysiyadani qoyska ugu dhigi karaan kuwo si fiican ugu shaqeeya qoysaska iyo dugsiyada. Si taasi oo la sameeyo, waxay la shaqeynayaan Oregon's Kitchen Table (OKT). OKT waxay martigelisay kulamadani lala leeyahay dadka qaybta ka ahaa wareysiyada qoyska ee ODE ee sanadkii 2022. Waxaan ugu yeernaa kulamadani wada hadalada bulshada "community conversations." OKT waxay weydiisay iyaga waxyaabaha soo socda ee ku saabsan sida wareysiyada qoyska loogu dhigi lahaa kuwo wanaagsan:

- Waxa waayo-aragnimada dadka ee wareysiyadii qoyska ee 2022 ay ahaayeen
- Fikradaha dadku ka haysteen wareysiyada qoyska ee mustaqbalka
- Sida qoysasku iyo barayaashu u maleynayaan in wareysiyada qoysku ay si fiican ugu shaqeyn karaan sanadaha soo socda

Warbixintani waxay soo koobaysaa waxa OKT ay maqashay markii la joogay kulamada OKT. Wixii ay dadku sheegeen ayaa koox ahaan la iskugu geeyay oo lagu daray fikradaha la midka ah.

## Ku saabsan Oregon’s Kitchen Table

OKT waa qayb ka mid ah Xarunta Is-afgaradka Siyaasadda Qaranka oo ku yaala Jaamacadda Gobolka Portland. OKT waxay ka shaqeysaa in dadka oo dhan la siiyo cod ah dhanka go’aan qaadashada dadweynaha. Waxaanu ka shaqeynaa isku xirka dadka aan sida caadiga ah lagu darin go’aanadani. OKT waxay dadka ka caawisaa in dadku ka hadlaan arrimaha gobolka degaanka, iyo heerka goboleedka. OKT waxay isticmaashaa siyaabo badan iyo luqaddo badan si loo ogaado waxa ay dadku qabaan iyo waayo-aragnimada.

## Wacyigelinta iyo ka qayb qaadashada

Kulamada OKT waxaa ka mid ahaa lix iyo toban ah wada hadalada bulshada iyo saddex wareysiyada shakhsi oo lala lahaa dadka ku lugta lahaa wareysiyada qoyska ee ODE. OKT waxay wax ka dhageysatay 118 oo qof kulamadani. Dugsiyada ka tirsan mashruuca tijaabada ahi waxay istimaaleen qalabka OKT si ay qoysaska ugu martiqaadaan wada hadalada bulshada. OKT waxay si toos ah u martiqaaday shaqaalaha dugsiga iyo macallimiinta sameeyay wareysiyada qoyska ama soo qabanqaabiyay iyaga.

## Waxa ay OKT maqashay

*Waxyaabaha dadku isku raaceen*

Dad badan ayaa waxyaabo isku mid ah ka sheegay kulamadii OKT. Hoosta waxaan ku qeexnay fikradahaasi ay dadku ka mideysnaayeen:

- **Dadku waxay qiimeeyaan isku xirka iyo fursadaha la wadaago**
    - Qoysaska iyo barayaashu **labadooduba waxay qiimeeyaan isku xirka**.
    - Qoysasku waxay qiimeeyaan fursadaha **ay ku wadaagi karaan wax ku saabsan carruurtooda**. Waxay rabaan in barayaashu ogyihiin sida carruurtoodu wax u bartaan iyo waxa ay tahay caawimaada ay u baahan yihiin si ay wax u bartaan.
    - Qoysas iyo barayaal badan ayaa dareemaya in wareysiyada qoysku ay ka caawiyaan qoysaska ku cusub dugsigu **in ay dareemaan in dugsigu yahay meel ammaan ah**, oo soo dhaweyn leh.

    - Barayaal iyo qoysas badan ayaa jeclaan lahaa **fursado joogto ah** oo loogu talagalay qoysaska iyo barayaasha si ay la iskugu xiro oo u wadaagaan waxa ay qabaan.
    - Barayaasha iyo qoysasku waxay sheegeen in wareysiyada qoysku **ka caawiyaan macallimiinta in ay wax ka ogaadaan** ardaydooda cusub iyo qoysaska.  Wareysiyadu waxay sidoo kale macallimiinta ka caawiyaan in ay isku diyaariyaan sida loo taageerayo ardaydooda cusub.

- **Dadku waxay leeyihiin baahiyaha dhanka wada xiriirka iyo ilaha**
    - Dadku waxay sheegeen in **taageerada loogu talagalay luqaddaha badani ay muhiim u tahay** wareysiyada qoyska. Tani waxay qoysaska ka caawisaa in ay wax ka fahmaan bilaabida dugsiga barbaarinta carruurta. Waxay sidoo kale ka caawisaa in ay bartaan macallimiinta iyo kuwa kale ee jooga dugsiga.
    - Barayaasha ayaa jeclaan lahaa **caawimaada turjumaada iyo fasiraadda**.
    - Barayaashu waxay sheegeen in ay **adag tahay la helo wakhti** wax lagu qorsheeyo laguna sameeyo wareysiyada qoyska.
    - Barayaasha iyo macallimiintu waxay sheegeen in wareysiyada qoysku u baahan yihiin in ay noqdaan **kuwo gaar ah oo qarsoodi ah**.

- **Dadku waxay rabaan macluumaad dheeraad ah**
    - Qoysas badan ayaa jeclaan lahaa **macluumaad dheeraad ah** si loogu diyaariyo iyaga wareysiyada qoyska.
    - Qoysaska iyo barayaasha waxay rabaan in ay ogaadaan **sida macluumaadka laga helo wareysiyada qoyska loo isticmaali doono**. Waxay si gaar ah u rabaan in ay ogaadaan sida macluumaadka ku saabsan adeegyada ay ardaydu isticmaaleen ka hor dugsiga barbaarinta carruurta loo isticmaali doono.
    - Qoysaska iyo barayaasha ayaa jeclaan lahaa **su’aalo kala cad** oo ku saabsan adeegyada ay ardaydu isticmaaleen ka hor dugsiga barbaarinta carruurta. Waxay jelaan lahaayeen tusaalooyin.

*Waxyaabaha dadku isku khilaafeen*

Dad badan ayaa ka hadlay fikrado aysan dadka kale la wadaagin iyaga. Hoosta waxaan ku qeexnay fikradahaasi:

- **Dadku waxay isku khilaafeen in ay tahay in ardaygu joogo wareysiga.**
  Dadka qaarkood waxay dareemeen in ay u fiicnaan lahayd ardayga iyo macallinka in ay ku kulmaan wareysiga. Kuwo ayaanan rabin in ay macluumaad ku saabsan ilmahooda la wadaagaan macallinka.
- **Dadku waxay dareeno kala duwan ka qabeen su'aalaha wareysiga ee ku saabsan adeegyada ardaydu isticmaaleen ka hor dugsiga barbaarinta carruurta.**
  Qoysaska qaarkood ayaa su'aalahaasi u arkay in ay faa'iido u leeyihiin ilmahooda. Qoysaska qaarkood waxay dareemeen in su'aalahu ahaayeen kuwo wax faragelinaya.
- Dadka qaarkood ayaa codsaday **su'aalaha wareysiga oo ku saabsan qoyska ama qaybaha guriga.** Waxay qabeen in su'aalaha kuwani oo kale ahi ay macallimiinta ka caawin karaan in ay si fiican u caawiyaan ardayda.
- **Dadku waxay fikrado kala duwan ka qabeen qaabka ugu wanaagsan ee wareysiyada qoyska.**
  Qoysaska intooda badan waxay sheegeen in ay jeclaysteen in ay si shakhsi ah macallinka ugula kulmaan fasalka dhexdiisa. Kuwo kale waxay sheegeen in ay doorbidayaan qaab ka duwan ama qaabab isku dhafan. Dadka qaarkood waxay rabeen in ay macallinka kula hadlaan telefoon ahaan. Dadka qaarkood waxay rabeen in ay su'aalaha kaga jawaabaan qoraal ahaan ka dibna si shakhsi ah ula kulmaan macallinka.

## Talo soo jeedin ku saabsan isku xir dheeraad ah

*In ay ku dhisnaadaan wada hadalada bulshada*

Waxaanu ku talinaynaa in ODE, ELD, iyo dugsiyadu ay tixgelin siiyaan adeegsiga wada hadalada bulshada ee mustaqbalka si la iskugu xiro qoysaska iyo barayaasha marka la

joogo bilawga dugsiga barbaarta carruurta. Wada hadalada bulshada OKT waxay ku saabsanaayeen wanaajinta wareysiyada qoyska. Si kastaba ha ahaatee, dad badan ayaa sheegay in sameynta isku xir ay ahayd faa'iido kale.

*Qoysaska oo laga caawiyo in uu midba midka kale wax baro*

Waxaanu ku talinaynaa in ODE, ELD, iyo dugsiyada ka qayb qaadanayaa ay tixgelin siiyaan sida qoysaska ka qayb qaata wareysiyada qoyska hal sano ay waxa ay bartaan ugu sii gudbin karaan qoysaska bilaabaya dugsiga sanadka soo socda. Habkani oo kale, waalidiinta cusub ayaa loo diyaarin karaa wareysiyada qoyska iyo bilaabida dugsiga barbaarinta carruurta. Qoysasku waxay sidoo kale dhisi karaan isku xirid cusub oo lala leeyahay qoysaska kale.

*Dugsiyada oo laga caawiyo in uu midba midka kale wax baro*

Waxaanu ku talinaynaa in ODE iyo ELD ay tixgelin siiyaan sida barayaasha iyo dugsiyada ka qayb qaata wareysiyada inta lagu jiro sanadaha hore ee tijaabada ah "pilot" ay waxa ay bartaan ugu sii gudbin karaan dugsiyada ku cusub adeegsiga wareysiyada qoyska. Habkani oo kale, dugsiyada cusub ayaa loo diyaarin karaa sida loo qorsheeyo wareysiyada qoyska. Dugsiyada isku dayay wareysiyada qoysku waxay wadaagi karaan waxa u shaqeeyay ama waxaanan u shaqeynin iyaga.

## Gunaanadka

Dadka ka qayb qaatay wareysiyada qoyska iyo wada hadaladu waxay ka kala yimaadeen sagaal dugsi oo kale. Bulshooyinkoodu si aad ah ayuu midba midka kale uga duwan yahay. Laakiin dhamaantood waxay daneeyaan isku xirka iyada oo carruurtoodu bilaabayso dugsiga barbaarinta carruurta. Dadku waxay rabaan in ay wax iska ka bartaan oo midba midka kale wax dhageysto oo ku saabsan ardaydooda dugsiga barbaarinta carruurta iyo sida ugu wanaagsan ee loo buuxin karo baahiyadooda. Wareysiyada qoysku waxay fursad u noqon karaan qof kasta si dugsiga loo bilaabo iyada oo uu jiro dareen farxadeed.

Xigashooyinka

“Waxay ahayd (wareysiga qoysku) ahaa sida, in aanan la codsan caawimaad, ee kaliya la helayay.  Shakhsi ahaaneed.  Wuxuu ku saabsanaa ilmahayga, ma aha carruurta guud ahaan, iyo in adiga lagula shaqeeyo (waalidka) ).”

“(Wiilka aan dhalay) had iyo jeer naftiisa uma doodi karo. Tani waxay noqotay fursad loogu doodo isaga.”

“Marka la eego dugsigayga, su’aalaha ayaa ku wanaagsanaa in loo ogaado qoysaska wadajir ahaan.  Qaar ka mid ahi waa waalid markii ugu horreysay mana garanayaan sida loo wada xiriiro ama sida dhan kale looga maro dugsiga.”

“Y la maestra me dijo te voy a dar un cuestionario para conocer mejor a tu hijo, se me ocurrió que era muy buena idea, porque vienen de un periodo muy largo de COVID, porque mi hijo solo fue al Head Stark por 2 meses presencial y todo el demás tiempo fue virtual, y me ayudo a saber cuales eran las virtudes y cuales eran las cosas en las que mi hijo puede tener más dificultades, y entonces sí me siento sorprendido y me siento bien de que la escuela se haya puesto en contacto conmigo para presentarme al maestro. Me sentí sorprendido porque no sabía de qué trataría. (Somali: “Waxaan qabaa in ay ahayd fikrad wanaagsan, maxaa yeelay wiilkaygu wuu ku dhex lumay ka dib muddadan dheer ee COVID.  Wiilkaygu wuxuu kaliya si shakhsi ahaaneed u aaday Head Start muddo 2 bilood ah iyada oo wakhtiga intiisa kale uu ahaa dhanka internet-ka.  Wuxuu iga caawiyay in aan barto waxa wiilkaygu dhib kala kulmi karo. Waxaan la yaabanahay sababta oo ah ma aanan ogeyn waxa uu ku saabsanaa waana mid wanaagsan in dugsigu ila soo xiriiro si ay ii baraan macallinka.”

“Su’aasha ku saaban “barnaamijyadu” ee ay heli kareen carruurtu waxay ahayd su’aal jahwareer leh. Waxaa loo qaabayn lahaa sidii ay tahay su’aal aan xad lahayn oo kale oo loogu talagalay waalidiinta.  Waalidiinta intooda badani ma aysan garayn wax ku saabsan magacyada barnaamijyada ama in ay qayb ka ahaayeen iyaga. Waalidiintu aqoon uma lahayn barnaamijyada.”

“Me gustaría que hubiera dos entrevistas, una solo con los padres y otra para traer al hijo..” (Somali: "Waxaan jeclaan lahaa in ay jiraan laba wareysi, mid lala leeyahay waalidiinta oo kaliya iyo mid kale oo ilmaha la keenayo.”)

“Hal shay oo ka soo baxay kulankii jawaab celintu wuxuu ahaa sida ay u jeclaayeen in ay qolka wada joogaan. Waxaanu leenahay habeenka waalidka laakiin waxa uu kaga duwanaa wuxuu ahaa in aan wada hadalno halkii aan macluumaadka ka gudbin lahayn anagu.  Waa in uu midba midka kale ku xirmaa. Waxaan maqlay iyaga oo midba midka kale ka weydiisanaya lambarradooda. Waxa ugu weyn ee aan meesha ka fahmay waa rabitaankooda in ay isku xirmaan.”